

Gelatine Xukunkiisu Muxuu Yahay

Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatu.

Shaygaan la yiraahdo: gelatine-ka, waa qeybo badan yahay.

1- Mar waxaa laga sameeyaa, dhirta (daaqa, ama Nabaat-ka, ama dhirta yaryar), sidoo kale, waxaa laga sameeyaa, xoolo laqalan karo, isla markaana si sharci ah loo gawracay, sida Looda.

Labadaan xaaladoodba, waa bannaantahay in la cuno, ama la isticmaalo, shaygaas uu ku jiro: gelatine-ku, Culumaduna waa isku waa faqsanyihii xalaal-nimadiisa.

2- Waxaa kale oo laga sameeyaa: gelatine-ka, wax ka mid ah, Doofarka, sida haragiisa, Lafahiisa, iwm.

Sidoo kale waxaa laga sameeyaa: gelatine-ka, Xoolo bakhtiyey, ama aan si sharciga waa faqsan loo gawricin.

Xalaaddaan iyada ah, oo gelatine-ka, laga sameeyey, doofaar ama xoolo bakhtiyey, culumadu waa isku khilafaan, oo qaarkood waa xaaraan timaynayaan, mar haddii asalku xaaraan yahay, culumo kalana waa bannaynayaan, iyaga oo ku doodaa in shaygii is beddelay, magac ahaan iyo tilman ahaan, oo wax la yiraahdo, khal uu dhacay, sidaas daraadeedna uu xalaal yahay.

Culumada aan baanayn gelatine-ka, waxaa kamid ah: Culumada waaweeyn ee Sucuudiga ee ah Iajnada, waana tan fatwada ay ku xaaraan timeeyeen:

السلام عليكم ورحمة الله وبركاته
أختي هذه فتوى:
علماء اللجنة الدائمة - بالمملكة العربية السعودية

. فتوى برقم 8039 وتاريخ 28 / 1 / 1405 هـ " .

هل الجيلاتين حرام ؟ : السؤال
لجواب:

الجيلاتين إذا كان محضرًا من شيء محرم كالخنزير، أو بعض
أجزائه كجلده وعظامه ونحوهما فهو حرام
قال تعالى : سورة المائدة الآية 3 {**حُرِّمَتْ عَلَيْكُمُ الْمَيْتَةُ وَالدَّمُ
وَلَحْمُ الْخِنْزِيرِ**} ، وقد أجمع العلماء على أن شحم الخنزير داخل
في التحرير ، وإن لم يكن داخل في تكوين الجيلاتين ومادته شيء
من المحرمات فلا بأس به.

وبالله التوفيق وصلى الله على نبينا محمد وآلها وصحبه وسلم
اللجنة الدائمة للبحوث العلمية والإفتاء
عضو ... عضو ... نائب رئيس اللجنة ... الرئيس
عبد الله بن قعود ... عبد الله بن غديان ... عبد الرزاق عفيفي ...
عبد العزيز بن عبد الله بن باز

Waxaa soo ururiyay:

Macalim Khalif Adisamad (Xafidahullah)

Wabillaahi Tawfiiq.

Wassalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh